## Naafaynta xubinta taranka

**Nooc kasta oo naafaynta xubinta taranka ah waa ka mamnuuc sharciga Iswiidhan (1982:316).** Qofkii jebiya sharciga waxa lagu xukumi karaa xarig ilaa 10 sano ah. Xataa iskudayga iyo abaabulka naafaynta xubinta taranka waa sharcidarro.

**Waxaa iyana sharcidarro ah in go'aan wadatashi qof xubinteeda taranka lagu naafeeyo ama la iskudayo in qof kale laga dhaadhiciyo inuu fal dembiyeedka geysto.** Xataa in la ballanqaado ama in la soo jeediyo in la fuliyo naafaynta xubinta taranka waa dembi.

**Qofka dacwad ayaa Iswiidhan looga soo oogi karaa xataa haddii naafayntu ay ka dhacday dal aysan dembi ka ahayn.** Suurogal iyana maaha in qof naafaynta oggolaaday oggolaanshihiisa lagu naafeeyo.
Intii ka dambeysay 1 may 2020 waxaa la joojiyay shuruuddii ahayd in muddo cayiman loo qabto dacwo-oogga naafaynta xubinta taranka ilmaha.
Qof kasta, xataa waalidka, ayay saaran tahay mas'uuliyadda ka hortagga naafaynta xubinta taranka.
In dembiga dhacay la soo sheegi waayo waa wax ciqaab lagu mutaysto.

*Sharciga (1982:316) mamnuuca naafaynta xubinta taranka dumarka*

Nationellt centrum mot hedersrelaterat våld och förtryck

Polisen

## Cawaaqib

**Naafaynta xubinta taranka dumarku waa xadgudub ay ujeeddadiisu tahay in la beddelo ama la dhaawaco xubinta taranka gabar ama dumar. Xaaladaha qaarkood, ereybixinta gudniin ayaa naafaynta xubinta taranka beddelkeed la adeegsadaa.**
**Naafaynta xubinta taranka waxyeellooyin badan ayay leedahay oo waxay tusaale ahaan nolosha dambe keeni kartaa dhibaatooyinka soo socda;**

- Dhiigbax weyn qalliinka ka dib
- Caabuqyo
- Xanuun xubinta hoose ee taranka
- Caqabado kaadi
- Caqabado caado
- Galmada oo lagu xanuunsado, rag iyo dumarba
- Dhaawacyo uurqaadidda qatar gelin kara
- Foosha oo caqabado ku yimaada
- Dhibaatooyin dhimmir
- Dhimasho

## Noocyada naafaynta xubinta taranka

**ida laga soo xigtay WHO, waxaa jira afar nooc oo naafaynta xubinta taranka ah:**

| | |
|---|---|
| **Nooca 1-aad.** | Kintirka iyo/ama buuryada kintirka oo la gooyo. |
| **Nooca 2-aad.** | Kintirka, dibnaha gudaha iyo xataa mararka qaarkood dibnaha dibadda ee siilka oo la gooyo. |
| **Nooca 3-aad.** | Gudniinka fircooniga. Kintirka, dibnaha gudaha iyo dibnaha dibedda oo la gooyo la iskuna tolo oo sidaas uu daloolka siilku ku daboolmo. |
| **Nooca 4-aad.** | Dhammaan faragelinta kale sida in kintirka iyo nudaha ku ag yaal lagu mudo shay fiiqan oo xubinta taranka dhaawaca. Taas oo loo yaqaan mudmudid. |

**Naafaynta xubinta taranka caafimaad-u-yaal ah:**
Naafayn xubin taran oo ay fuliyaan shaqaale daryeel caafimaad. Xataa hadday taasi dibedda ka dhacdo, waa dembi xagga sharciga Iswiidhan.

**Sunna:** Mararka qaarkood ereyga ”sunna” ayaa la sheegaa marka laga hadlayo noocyada kala duwan ee naafaynta xubinta taranka, xataa ”sunna” waa sharcidarro.

## Miyaad adiga ama qof aad taqaan u baahan tihiin caawimo?

Haddaad ka welwelsan tahay in adiga qudhaadu ama qof kuu dhow ay ku wajahan tahay qatar ah in loo geysto naafaynta xubinta taranka, Iswiidhan ama dibedda, waxaad la xiriiri kartaa oo welwelkaaga uga warrami kartaa adeegga bulshada, heeganka adeegga bulshada ama booliska degmadaada.

### Degmadaada

Bogga internetka degmadaada waxaa ku yaal macluumaadka xiriirka adeegga bulshada iyo heeganka adeegga bulshada. Waxaa iyana suurogal ah inaad heeganka adeegga bulshada ka haleesho khadka SOS Alarm ee 112, haddaadan fursad u lahayn inaad lambarka telefoonka si kale ku hesho. **Had iyo jeer, adigoo aqoonsigaagu qarsoon yahay ayaad waci kartaa adeegga bulshada iyo heeganka adeegga bulshada.**

### Booliska

**Haddii arrintu degdeg tahay, booliiska ka wac 112.** Haddaysan arrimuhu degdeg ahayn wac 114 14, haddaad dibedda joogtana +46 77 114 14 00.

### Wasaaradda arrimaha Dibedda (UD)

Haddaad dibedda joogto oo aad ka welwelsan tahay naafaynta xubinta taranka, waa inaad la xiriirtaa safaaradda ama qunsuliyadda Iswiidhan ee dalka aad joogto. Safaaradda iyo UD waxay baari karaan inay jiraan wax laguu qaban karo si aad Iswiidhan dib ugu soo laabato. Liiska safaaradaha Iswiidhan waxaa laga heli karaa bogga swedenabroad.se. **Waxaad iyana heeganka UD ka wici kartaa +46 (0) 8-405 50 05. Heeganka UD wuxuu furan yahay 24 saac, maalinkasta.**

Nationellt centrum | mot hedersrelaterat våld och förtryck

Polisen

*Sharciga (1982:316) oo mamnuucaya gudniinka gabdhaha*
*Qoraalkaan waxaa soo saartay Xarunta qaranka ee ka hortagga tacaddiga iyo dulmiga la xiriira dhaqan sharafeedka.*

*According to Swedish law (SFS 1982:316)*

# INFORMATION OM KÖNSSTYMPNING

*Somaliska*

Sverige